



MIDOWGA MUSHARAXIINTA PUNTLAND

war-saxafadeedka midowga musharaxiinta puntland 2019

Date: 10/10/2018

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ .

Warsaxaafadeedkan waxa si wada jir ah usoo saaray dhamaan xubnaha ay ka kooban yihiin Midowga Musharixiinta Puntland oo magacyadooda aad ku arki doontaan qoraalkan qayb kamida.

Midowga Musharixiinta Puntland markay arkeen xaaladaha qalafsan ee uu marayo dalka soomaaliya gaar ahaan dowladda Puntland.

Midowga Musharaxiintu Puntland markuu ukuur galay meesha uu marayo xiriirka Dowladda dhexe iyo maamul gobaleedyada.

Midowga Musharaxiintu Puntland markuu arkay nabad galyo xumada ka jirta guud ahaan gayiga soomaaliyeed gaar ahaan deegaano katirsan Puntland sida gobolka bari.

Midowga Musharixiinta Puntland markuu ukuur galay una muuqatay dib u dhac ka jira dhinaca gudigii xalinta khilafaadka, xulista xubnaha golaha shacabka Puntland.

Midowga Musharixiinta Puntland markuu arkay suuragalnimada ku takri falka hantida udhaxaysa shacabka Puntland.

Wuxu soo saaray warsaxaafadeedkan.

- 1) Midowga Musharixiinta Puntland wuxuu ugu baaqayaa dhamaan umadda soomaaliyeed shacab iyo xukuumadba inay ilaaliyan midnimada iyo wadajirka.
- 2) Midowga Musharixiinta Puntland waxay ugu baaqayaan dhamaan umadda soomaaliyeed gaar ahaan shacabka Puntland in meel looga soo wada jeedsado cadowga soomaaliyeed isla markaana amniga iyo horumarka lagala shaqeeyo dowladda dhexe iyo dowladda Puntland.
- 3) Midowga Musharixiinta Puntland wuxuu ugu baaqaya dowladda dhexe iyo dowlad gobaleedyada in la isu tanaasulo oo loo turo shacabka soomaliyeed oo ay mudada dheer ragaadisay dawlad la'aantu.
- 4) Midowga Musharixiinta Puntland waxa ay ka digayaan in uu ku yimaado dib udhac ama maroori kayimaada xukuumadda hada jirta magacaabidda guddiga xalinta khilaafaadka xulista xubnaha golaha shacabka Puntland 2019, taasoo keeni karta khilaaf iyo isfaham waa siyaasadeed.
- 5) Midowga Musharixiinta Puntland waxay sidoo kale ka digayaan in xukuumadda hada jirta ay ku takri fasho u adeegsiga hantida iyo agabka dowladda Puntland olalaheeda tartanka hogaanka sare ee Puntland.
- 6) Midowga Musharixiinta Puntland waxa war saxaafadeedkan baaq ugu diriyaan dhamaan isimada iyo wax gardka Puntland iyagoo ku baraarujinaya inay tahay meesha kaliya ee wax laga sixi karaa maanta xulidda Xubnaha golaha shacabka Puntland oo allah uu gacantooda galiyay kalana xisaabtami doono,hadaba Midowga Musharixiinta Puntland iyagoo kalsooni buuxda ku qaba Isamadooda iyo waxgaradkoodaba waxay ugu baaqayaan inay maanta shacabkooda ugu hiiliyaan xulidda xubnaha golaha shacabka Puntland inay u xulaan xubno ku haboon masuuliyadaa allahna uga baqaya una turaya shacabka ay matalan.
- 7) Midowga musharixiinta Puntland waxay sidoo kale ugu baaqayaan dhamaan Culumaa'uudiinka,Aqoonyahanka,Ganacsatada,Siyaasiyiinta,Haweenka iyo dhalinyaradaba in laga wada qayb qaato isbadalka dhabta ah ee ay Puntland ubaahan tahay.

- 8) Midowga Musharixiinta Puntland ugu danbayn waxay ugu baaqayaan dhamaan Musharixiinta utaagan xilka hogaanka Puntland 2019 iyo xukuumadda hada jirto inay si wada jir ah uga wada shaqeeyaan sidii ay ku dhici lahayd doorasho xalaal ah oo wakhtigeedii ku dhacda.

Gunaanad.

Mudowga Musharixiinta Puntland waxa urajaynayaan dhamaan umadd soomiliyeed gaar ahaan shacabka Puntland Amni , istiqaar,iyo horumar.

Mahadsinidiin.

Alla Mahad leh.



Xubnaha Midowga Musharixiinta Puntland.

- 1) Abdisamed Mohamed Gallan.
- 2) Mohamed Said Hirsi Morgan.
- 3) Dr Mohamed Salad Ali Qoryoley.
- 4) Mohamed Ahmed Jama shaalle.
- 5) Mohamud Abdi Mohamed Huruse.
- 6) Said Ali Ahmed Qurbawi.
- 7) Abdirizak Abdullahi Jama Janno Gale.
- 8) Haji Mohamed Yasin.

Guddoomiyaha Midowga Musharixiinta Puntland 2019

Abdisamad Mohamed Gallan

Tell: +254742343942 +252907799971